# Tilmaamta COVID-19

Si hoos loogu dhigo fiditaanka xaaladaha COVID ee sida degdega ah u kordhaaya gobolkeena oo loo hubiyo in nidaamka cisbitaalda iyo caafimaadka aan loo saameyn, waxaanu qaadaynaa talaabooyinka adag lakiin daruuriga ah si aan u ilaalino caafimaadka.

Waxaanu aqoonsanahay in tani ku sababi doonto caqabad dhaqaale ganacsiyo badan badhasaabka iyo shaqaaluhuna waxay sahaminayaan siyaabo badan oo lagu yareeyo saameynta.

- Laga bilaabo Isniinta, Noofeembar 16 ilaa Isniinta, Diseembar 14, dhamaan degmooyinka Washington waxay kusoo noqonayaan xanibaadaha sare lagu xusay.

**Waxkabadalaada xanibadaha dhamaan degmooyinku waxay hirgalayaan saqbadhka Isniinta, Noofeembar 16, ilaa iyo hadii kale la sheego.** Hadii shaqada aan la sheegin, waxay raacayaan tilmaamta hada. Dhamaan K-12/waxbarashada sare, dartyeelka caafimaadka, iyo daryeelka caruura waa laga reebay xanibaadaha cusub waxayna raacayaan tilmaamta hada. Xanibaadahan ma khuseeyaan maxkamadaha iyo xukumada sharciga la xiriira.

1. **Isku Imaatinka Goobaha Hoose** ee dadka ka baxsan qoyskaaga waa la mabnuucay ilaa (a) la karantimeeyo afar iyo toban cisho (14) ka hor isku imaatinka; ama (b) karantimayn todobo (7) cisho ka hor isku imaatinka bulshada oo uu helo natiijo ka badqab COVID oo aan ka badnayn 48 saac ka hor isku imaatinka. Qoyska waxa lagu tilmaama akhshaasta kula degan hoy.
2. **Isku imaatinka Bulshada** waxa lagu xadidi doonaa shan (5) qof oo k baxsan qoyskaaga.
3. **Hudheelada iyo Baararka** waa la xidhayaan adeega cashada. Adeegyda cashada iyo qaadashada waa la ogol yahay, iyadoo shardigu yahay in dhamaan cashooyinku u hogaansamaan shuruudaha Tilmaamta Cashada Dibada. Xajmiga miiska cashada dibada waxa lagu xadiday shan (5) qof. Isbadelada xanibaadaha hudheelada iyo baararku waxay dhaqan galayaan 12:01 a.m. Arbacada, Noofeembar 18, 2020.
4. **Xarumaha jimicsiga iyo jiimamku** way xian yihiin hawlgalada gudaha. Fasalada jimicsiga waa la ogol yahay lakiin waxa ku xiran shuruudaha xanibaadaha sare ku xusan.
5. **Xarumaha ciyaaruhu** way ka xirn yihiin adeega gudaha
6. **Goobaha Nusasaacaha:** Dhamaan shaqooyinka iyo kulamada ganacsiyada waa la mabnuucay. Kaliya tababarada xirfadaha iyo imtaxaanada laguma qaban karo habka durugsan, sidoo kale dhaman maxkadaha waa la ogol yahay. Buuxinta kulamada qolalka waxa lagu xadiday boqolkiiba 25 ama 100 qof, kolba midka yar.
   - Goobaha nusasaacaha waxa ku jira: Xarumaha kulamada/shirarka, meelaha kulamada ee huteelada, xarumaha dhacdooyinka, goobaha ciyaaraha, ama meelaha kale ee la midka ah.
7. **Xarumaha aflaamta** way ka xirn yihiin adeega gudaha Xarumaha aflaamta waa la ogol yahay waana inay raacaan tilmaamta hada jirta.
8. **Madxafyada/beeraha xayawaanka/meelaha** waa laga xiray adeega gudaha.

9. **Hanitida ma guurtada:** Ganacsiyada furan waa la ogol yahay.
10. **Aroosyada iyo asaaska:** Xafladaha waxa lagu xadida wadar aan ka badnayn 30 qof. Meelah gudaha, ama meelah la midka ah ee xafladaha waa la mabnuucay.
11. **Tafaaqiirda** waxa lagu xadidi doonaa boqolkiiba 25, iyo meelaha caamka ah/ la iskugu imaado iyo xarumaha cashada ida cuntada waa la xirayaa.
12. **Adeegyada Diimaha** waxa lagu xadiday boqolkiiba 25 in aanu ka badan, oo aanu ka badan 200 qof, kolka kii yar, Isku imaatinka xubnaha/ ka qeybgalayaashu waa inay xirtaan daboolka wajiga dhamaan wakhtiyada oo heesida masraxyada waa la ogol yahay. Bilaa heeso, ama heesayaasha waa inay jilaan inta lagu jiro adeega. Heesayasha ama jilayaasha waa la ogol yaha in la sameeyo oo waxa yeelan karaan raace. Adeegyada dibadu waa inay u hogaansamaan Tilmaamta Cashada Dibada halkan, ee khuseeya qaabka ama xarunta.
13. **Adeegyada Xirfasa** waxa loo baahan yahay inay awood u siiyaan shaqaalaha inay kasoo shaqeeyaan guriga markay macquul tahay oo ay xiraan xafiisyada haday suurtagasho. Xafiiskasta oo furan waa inuu ku koobaa boqolkiiba 25 inay ku jiraan.
14. **Adeegyada xirfada** waxa lagu koobay 25 boqolkiiba inay ku jiraan.
    - Bixiyayaasha adeega xirfada: qurxiyayaasha, timo habeeyayaasha, rayslayaasha, maqaar nadiifiyayaasha, cidi gurayaasha, shaqaalah qurxinta cidiyaha, timo fasameeye, shaqaalaha qurxinta wajiga, iyo goobahaasi.
15. **Xarumaha daryeelka mudada dheer:** Booqashooyinka banaanka waa la ogol yahay. Booqashooyinka gudaha waa la mabnuucay, lakiin shakhsiyada ka reeban waa qofka caawimo daruuriya ama daryeel nololeed bixinaya waa la ogol yahay. Xanibaadahan waxa sidoo kale lagu fidiyey xarumaha Proclamation 20-74, et seq. Dhamaan shuruucda Proclamations 20-66, et seq., iyo 20-74, et seq., oo ay ku jiraan shuruuda hordhaca waxay u ogolaanayaan booqdakasta, inuu dhaqangaliyo.
16. **Shaqooyinka Dhalinyarada iyo Ciyaaraha:** Shaqooyinka gudaha iyo dhamaan tartanada iyo ciyaaraha waa la mabnuucay. Shaqooyinka banaanka waxa lagu koobay xeerarka kaliya, daboolka wajiga waxa looga baahan yahay tabobarayaasha, mutadawiciinta iyo ciyaaraha fudud dhamaan wakhtiyada.